



EAST FEDERAL WAY

BUUG-HAGAHA AH EE DEJINTA MIISAANIYADDA KA-QAYBGALKA 2023-2024




**Sidee u rabtaa inaad u kharash gareyso
maalgelinta aaggaaga?**



Si aad ugu codsato macluumaaadkan luuqad kale ama qaab kale, wac
206-477-3800 ama iimayl u dir AskLocalServices@kingcounty.gov

EAST FEDERAL WAY



Bulshada East Federal Way ee magaalada ka baxsan Degmada King waxay haysataa \$1,516,000 si loogu isticmaalo wareeggeena labaad ee dejintra miisaaniyadda ka qaybgalka ee (2023-2024).

Xubnaha bulshadu waxay
go'aansan doonaan sidii ay
dhaqaalahan ugu bixin lahaayeen
mashaariicda, barnaamijyada, iyo
adeegyada ay uga faa'iideeyaa
bulshadooda.

Mashaariicda raasulmaalka ah: \$1,516,000

SIDEE QAYB **OGA** NOQON KARTAA DEJINRTA MIISAANIYADDA KA QAYBGALKA?

Noqo mutadawac - waxaa la heli karaa jagooyin iyo doorar badan

- ▶ Codso xubunimada **Guddiga Joogtada ah**
- ▶ U shaqee sida **U-doodayaasha soo jeedinta**
- ▶ Wadaag macluumaadka ku saabsan ka qaybgalka miisaaniyada bulshadaada adoo noqonaya safiirka **dejinta miisaaniyadda ka qaybgalka**
- ▶ Adiga ama ururkaaga ayaa noqon kara iskuxiraha bulshada ee **Dejinta Miisaaniyadda** iyo qabanaabiyyaha xalfadaha bulshada

Qayb ka noqo nidaamka!

- ▶ Xaadir xalfadaha bulshada iyo/ama kulanada
- ▶ Soo gudbi fikir ama bixi warbixin
- ▶ Noqo mutadawac
- ▶ Ka qaybqaado hawlaha dejinta miisaaniyadda
- ▶ La wadaag macluumaad qoyskaaga, saaxiibadaa, deriskaaga, iyo shabakadaha ku saabsan dejinta miisaaniyadda deeggaankaaga



GOOBAHA DIIRADA LA SAARAAYO

Xubnaha guddiga joogtada ah ee Center/North Highline waxay go'aansadeen in ay hannaanka diiradda ku saaraan (laakiin aanay ku xaddidin) maalgelinada la xiriira arrimahaan soo socda:

Mashruucyada Raasumaalka ah

- ▶ Wadooyinka baaskiilada iyo socodka
- ▶ Horumarinada wadada degmada ganacsiga
- ▶ Beerta bulshada
- ▶ Xarumaha dhaqanka iyo goobaha bulshada
- ▶ Kordhintaa dookhtada isku socodka
- ▶ Hagaajinada Beerta
- ▶ Wadooyin ammaan ah - hagaajinta geesaha wadada iyo wadada

Aagga diirada lagu saaraayo mashruucyada raasumaalka waxay ka kooban yihii mashruucyo awooda saaa kor u qaadista badqabka bulshada, isku dhafka, iyo joogteyn.

Mashruucyadaan waa inay soo bandhigaan dadaal cad oo la xariira wax ka qabashada bulsho gaar ah iyo caqabadaha dhaqaale ee ay wajahayaan bulshada East Federal Way.



YAA AWOODA INUU...

Inuu soo gudbiyo fikir?

Qof walba: Oo ay tahay inuu ku noolaado, ka shaqeeyo, ka aado dugsi, ama meelaha lagu barto diinta, iyo/ama awooda inuu soo bandhigo xiriir aad u adag, oo ku aadan bulshadaan.

U shaqeeyo sida U-doodayaasha soo jeedinta?

Dadka jira 18 sano iyo kasii wayn: Oo ay tahay inuu ku noolaado, ka shaqeeyo, ka aado dugsi, ama meelaha lagu barto diinta, iyo/ama awooda inuu soo bandhigo xiriir bulsho oo adag, oo ku aadan bulshadaan.

Yaa Coddeynaya?

Dadka jira 12 sano iyo kasii wayn: Oo ay tahay inuu ku noolaado, ka shaqeeyo, ka aado dugsi, ama meelaha lagu barto diinta, iyo/ama awooda inuu soo bandhigo xiriir adag, oo ku aadan bulshadaan.

Majiraan shuruudo muwaadinimo ama aqoonsi oo la iska rabo.

U-QALMITAANKA MASHRUUCA

Waa maxay mashruucyada raasumaalka iyo maalgelinta?

Qeexitaanka: Maalgelinta raasamaalka waa in lagu sameeyaa shay la soo iibsaday, la dhisay, la rakibay, iyo/ama la hagaajiyay, oo ay ku jiraan kaabayaasha, waddooyinka, dhismayaasha, dhulka, jardiinooyinka, iyo qalabyada. Mashruuc kastaa guud ahaan waa inuu ahaadaa mid la isticmaali karo ugu yaraan 10 sano waana inuu faa'iido u leeyahay dadweynaha. Iyadoo ku xiran meesha laga helaayo maalgelinta, waxaa jiri kara shuruudo dheeraad ah. Mashruucu inuu ka jiro isla gudaha xadka aagga ka baxsan maamulka East Federal Way.

- ▶ Ma jiro kharashka **ugu yar** iyo **kharash ugu badan** ee shuruud looga dhigayo mashaariicda raasumaalka ah ee kajira aagga ka baxsan East Federal Way.
- ▶ Lama oggolaan doono wax ka badan todobo mashriic oo raasumaal ah oo loogu talagalay bulshadan oo loo codbixin doono

Fududaanta: Wuxaan soo dhaweyneynaa mashruucyada miisaanka leh, anagoo fulineyna dadaallada yaryar iyo kuwa waaweynba. Wuxaan si xiiso leh u dhiirigelinaa fikradaha baaxad kasta, anagoo aqoonsanayna suurtagalnimada hal-abuurnimada iyo hal-abuurka mashaariicda cabbirrada kala duwan leh.



TIXGELINADA MUHIIMKA AH

Tixgelinta mashaariicda raasUmaalka ee xarunta East Federal Way ee ku xeeran saddexda mabaadi'da lagama maarmaanka ah: xaddidaadda juqraafiyeed, kaladuwanaanshaha xoogga la saarayo, sinnaanta, iyo ka mid noqoshada, iyo diirad saarista dadaallada ku saleysan baahiyaha.

Marka koowaad, dhammaan xeerarka waa inay qirsan yihiin in mashaariicda si gaar ah loogu beegsanayo East Federal Way, iyadoo la hubinayo in soojeedintu ay wax ka qabato baahiyaha gaarka ah iyo sifoooyinka deegaankaan.

Marka labaad, waa in xoogga la saaraa kala duwanaanshaha, sinnaanta, iyo ka mid noqoshada, iyadoo ay ka go'an tahay in si firfircoo looga qaybgeliyo oo wakiil looga noqdo shaqsiyaadka ka soo jeeda asalka kaladuwan, kooxaha da'da, iyo xiriirkha si kor loogu qaado caddaaladda iyo fursadaha loo siman yahay ee ka qaybgalka.

Ugu danbeyntii, Kala horeysiinta baahiyaha ku saleysan mashaariicda raasumaalka waa inay ahaadaan udub-dhexaad, oo soo jeedintu ujeedadeedu tahay in wax laga qabto shuruudaha bulshada muhiimka ah iyo caqabadaha, ugu dambeyntii bixinta faal'iidooyin la taaban karo oo kobciya korriinka, waaraatanka, iyo horumarinta guud ee fayoobida iyo tayada nolosha ee East Federal Way.

Tixgeliinooyin kale | Mudnaan siinta horumarka soojeedinta

Ka-hortagga barakaca: Mashaariicda raasumaalka ah waa in lagu daraa tallaabooyinka looga hortagayo barakaca iyo in la hubiyo xasilloonida iyo fayoobida dadka nugul, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobneyn shaqsiyaadka iyo qoysaska dakhligooduooseeyo. Waa in lagu dadaalaa sidii loo ilaalil lahaa hantida raasumaalka ah ee jirta (sida jardiinooyinka) iyo in la horumariyo mashruucyo raasumaal oo cusub oo la heli karo ee East Federal Way.

Ka-qaybgalka bulshada: Inta lagu guda jiro muddada qorsheynta iyo hirgelinta mashaariicda raasumaalka, ka qaybgalka bulshada iyo talada waa in si firfircoo loo raadiyaa loona tixgeliyo. Tani waxa ku jira la tashi lala yeelanaayo dadka deegaanka, hogaamiyaasha bulshada, iyo daneeyayaasha ay khusayso si loo hubiyo in mashaariicda raasumaalka ah ay la socdaan qiyamka bulshada iyo mudnaanta.

TIXGELINADA MUHIIMKA AH - SII SOCDA

Xarumo bulsho oo dhaqan ahaan khuseeya: Mashruucyada raasumaalka waa inay mudnaan siiyaan aasaaska ama tayeynta xarumaha bulshada ee u dabaaldega oo ilaaliya hidaha dhaqamada ee dadka deggan East Federal Way. Xarumahaas waa inay bixiyaan barnaamijyo iyo ilo ka turjumaya kaladuwanaanshaha dhaqanka bulshada.

Xarumaha daryeelka caafimaadka ee dhaqan ahaan habboon: Mashruucyada Raasumaalka waa inay diirada saaraan horumarinta xarumaha daryeelka caafimaadka ee awooda saara baahiyaha gaarka ah iyo walaacyada ay qabaan dadka kaladuwan ee East Federal Way. Xarumahaan waa inay bixiyaan adeegyo la heli karo oo dhaqan ahaan habboon waana inay siiyaan dhammaan dadka degan aagga.

Horumarinta dhaqaalaha: Mashruucyada Raasumaalka waa inay gacan ka geystaan kobaca dhaqaalaha iyo barwaaqada bulshada East Federal Way iyadoo kor loo qaadaayo shaqo abuurka, hal-abuurka ganacsiga, iyo fursadaha xirfad-dhisidda. Waa in xoogga la saaraa mashruucyada raasumaalka ah ee awooda lagu siiyo dadka la haybsooco, taageerana waxqabadyada maxalliga ah.

Qiimeynta iyo Isla Xisaabtanka: Qiimeynada joogtada ah iyo qiimeynta mashaariicda raasumaalka natijjooyinkooda iyo saamayntooda waa in la sameeyaa si loo hubiyo inay la jaanqaadayaan meelaha diirada la saaray iyo yoolalka la rabo. Hufnaanta iyo isla xisaabtanka fulinta mashruuca iyo qoondelynta miisaaniyada waa qayb muhiim ah si loo joogteeyo aaminaada dadwaynaha.

Dabacsanaanta iyo la qabsiga: Aagga diirada lagu saarayo mashaariicda raasumaalka ee East Federal Way waa inay ahaato mid dabacsan si loo daboolo baahiyaha bulshada ee isbadelaya iyo horumarinta caqabadaha. Marka ay arrimo cusub soo baxaan, waa in la isku dayo in wax laga badelo qorshayaasha mashruuca si waafaqsan, iyadoo la hubinayo in hindisayaashu ay sii ahaanayaan kuwo khuseeya oo waxtar leh muddo kadib.

Goobaha dhalinyarada: Mashruucyada raasumaalka waa inay kujiraan goobaha awooda la saaraayo iyo xarumaha wax looga qabto baahiyaha iyo kor u qaadista dhallinta East Federal Way. Goobahaan waxaa inay dhiirigeliyan horumarka wanaagsan ee dhallinta, hawlaha madadaalada leh, fursadaha waxbarashada, iyo ka qaybgalka bulshada.

Joogteynta iyo saameynta deegaanka: Mashruucyada raasumaalka ee East Federal Way waa inay raacaan mabaa'diida naqshada waarta, ee awooda lagu saaraayo in la yareeyo saameynta raadka deegaanka, iyo kor u qaadida mas'uuliyadda deegaanka. Waa in la sameeyo dadaalo la isku daraayo goobaha cagaaran, kaabayaasha tamarta, iyo dhaqamada deegaanka u wanaagsan mashaariicda.

U CODDEE QORSHEYNTA IYO NIDAAMYADA

Qaababka: Doorashada la qiimeeyay

Codbixiyayaashu waxay liis gareyn karaan oo ay kala hormarin karaan shanta mashruuc ee ugu sarreeya ee ay jecel yihiin, iyada oo aan loo eegin qiimaha.

Cod bixinta degdega ah

Haddii saddexda mashruuc ee ugu sarreeya ay helaan codad isku mid ah laakiin aan dhammaan la maalgelin karin, guddiga joogtada ah ayaa go'aansanaya in mashruuca loo kala hormarinaayo ayadoo lagu saleynaayo:

- ▶ Kor u qaadista sinnaanta jinsiyadaha ee wax ku oolka ah
- ▶ Ka-hortagga barakaca iyo soo dhaweynta dadka la barakiciyey
- ▶ Iyadoo la isticmaalayo miisaaniyadda, helitaanka hab lagu maalgeliyo dhammaan saddexda
- ▶ Samaynta tixgalin miisaaniyadeed si loo maalgeliyo mashruucyada

Haddii labada mashruuc ee ugu sarreeya xagga codadka la maalgelin karo laakiin mashruuca saddexaad aan si buuxda loo maalgelin karin iyadoo lagu saleynayo miisaaniyada hartay, mashruuca waxaa lagu maalgelin doonaa noocyoo kala duwan oo la ansixiyay lana xariira horumarinta soo jeedinta maalgelinta.

Haddii mashruuca saddexaad aan si buuxda loo maalgelin karin, guddigu wuxu iskudayi doonaa inuu qayb ahaan maalgeliyo haddii ay macquul tahay. Haddii qayb ahaan aan loo maalgelin karin, guddigu wuxuu u gudbi doonaa mashruuca xigga ee wata codadka ugu badan. Hadafku waa inaan isticmaalno miisaaniyadda oo dhan.

Haddii sababo jira qaarkood uu mashruucu noqdo mid aan suurtagal ahayn ka dib markii lagu maalgeliyay codka bulshada, maalgelinta mashruuca waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo mashruuca ugu codadka badan ee aan helin maalgelin iyo/ama in lagu bixiyo kharash dheeraad ah ama kadiska ah mashaariicda la maalgeliyo.

2021-22 (WAREEGA 1 AAD)

MASHRUUCYADA LA MAALGELIYAY

Mashruucyada Raasumaalka ah ee horumarinta

- ▶ Lake Geneva Park Upgrades “Let’s Play” (\$1.5 milyan)
- ▶ Xarunta Bulshada ee Dhaqanka ee East Federal Way (\$350,000)
- ▶ Beerta Bulshada/Maalgelinta P Patch (\$100,000)
- ▶ Bokiska Adeegyada – Farshaxanka Dhiirigelinta (\$35,000)